


Safarka iyo Kaadi macaanka/Sonkorowga



Hadaad kaadi macaan qabto cudurkaasi meelna kaaga hadhi mayo intaad nooshahay, laakin kaadi macaan baad qabtaa waa inayan kaa hor istaagin inaad fasax u aadid meelaha aad jeceshahay, hadaad si taxadar leh u qorshayso fasaxaaga waad ku raaxaysan kartaa. Marka hadaad doonayso inaad safarto, safarkaasi ha ahaado dhowr cisho ama dowl usbuuc. Halkan waxaan kuugu soo bandhigaynaa waxyaabo kaa caawiya in cudurku uusan faraha ka bixin.

1. Hore Usii Qorshee

- A. Usheeg dhakhtarkaaga qorshahaaga safar, weydiisana inuu kuu qoro waraaq ay ku qorantahay cudurkaaga noociisa iyo daawooyinka aad qaadataa nooca ay yihiin ee u baahantahay inaad qaadata. Waraaqdaa waa in ay ku qorantahay hadii wax lama filaan ah ay kugu dhacaan talaabooyinka aad qaadi lahayd uuna ku siiyo boorsada yar ee ay ku jiraan qalabka sonkorta lagu cabiro iyo wax yaabaha aad deg deg ugu baahan karto la,aantood ay dhibka tahay.
- B. Ka wada hadla hadii wax lama filaan ah kugu dhacaan waxaad yeeli lahayd
- C. Mar walba xaqiiji inaad qofka kula safrayaa ogyahay xaaladaada caafimaad cudurka macaankana aad qabto iyo waxa uu samayn lahaa haday wax lama filaan ah kugu dhacaan.
- D. Hadaad macaanka iska muddo aadna safar dhowr casho ah aad u amba baxayso, kala hadal dhakhtarkaaga sidii aad u isticmaali lahayd irbadaada.
- E. Hubi inaad wacdo diyaarada aad raacayso oo aad waydiiso waxyaabaha aan la isu ogolayn inaan diyaarada la raacdo.

2. Waxyaaba ay tahay inaad boorsada ku ridato

- A. Warqadaha aqoonsiga, boorsada jeebka lagu rito, dadka kaadi macaanka qabo kuusha ay luqunta sudhaan, waraaq eey ku qoranyahay daawada aad qaadata.
- B. Qalabka Kaadi macaanka oo dhan
 - Ku rido boorsada irbadaha sonkorta in kugu filan, faashada la isku dhejiyo in kugu filan intaad maqnaanayso oo dhan(inaad iska badsataana waa arin wanaagsan)
 - Qalabkaagaa waligaa meel aan kaa fogayn ha yaalaan, haddaad gaadhi raacayso qeybta danbe ha isaga xidhin, haddaad diyaarad raacasana boorsada lagaa xaraynayo ha iskaga ridin
- C. Kaba aan lugaha kaa xanuunjinay iyo sharabaado macaan oo suuf ka samaysan qaado.
 - Kaba aan markaa cusbayn oo cagtaadu baratay ayaa wanaagsan inaad ku safarto.
 - Hadaad kabo furan ama jambal ku safrayso jambalkaasi yay noqon kuwo leh Indhal ama suunka yar ee suulka iyo farta kala haya. Marna cago cadaan ha ku socon
- D. Qaado cunto yar oo fudud oo haday sonkortu kaa dhacdo aad cunto.
 - Midho fareesh ah ama qalalan, buskud ama wax kaloo wacan ood ka heshay.
 - Kiniinka macaanka sare u qaada, nac nac yar iyo soodhada caadiga ah dhamaan waxyaaba sonkortu haday dhacdo deg deg sare ugu qaada.
- E. Kaadhkaaga caymiska iyo qorshahaaga hadii xaalad caafimaad oo lama filaan ahi kugu dhacdo aad samayn lahayd.

Waxaan aad kuugu la talinaynaa inaad wixii intaa dhaafsiisan ee warbixin ah ee aad u baahantahay aad dhakhtarkaaga waydiiso. Sida Buuga Dadka Kaadi Macaanka qaba ee la qoray (2002) oo ay qortay Hey,ada Cudurka Sonkorta ee Maraykanka iyo wixii kale ee warbixin ah ee cudurkaaga ku saabsan ee uu ku siin karo.